

Suurat Al-Kaafiruun
سُورَةُ الْكَافِرُونَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaad dhahdaa, Gaalooy.
2. Ma caabudayo waxaad caabudaysaan.
3. Idinna ma caabudaysaan Eebahaan caabudi.
4. Mana caabudin waxaad caabuddeen,
5. Idinkuna (hadda) ma caabudaysaan Eebahaan caabudi.
6. Idinkana Diintiinna yaad leedihiin, Anna Diintaydaan leeyahay.

قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ﴿١﴾

لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٢﴾

وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ﴿٣﴾

وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَّا عَبَدْتُمْ ﴿٤﴾

وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ﴿٥﴾

لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ﴿٦﴾

Suuraddani waxay soo dagtay markii Gaaladii Quraysheed ay Nabiga waydiisteen inuu Ilaahyadooda (Sanamyadooda) Sano caabudo, iyana Ilaahiisa ay Sano caabudaan, markaasaa Eebe soo dajiyay Suuraddan, maxaa yeelay Ilaahay wax ka soo hadhay oo la caabudo ama laga Eeba yeesho ma aha isku soo dhawaansho, ee waxaa isku soo dhawaansha ah xumaantoo laga tago, iyo wanaaggo la raaco, waxayna ku tusin Suuraddu inaan Ruuxna Qasab lagu islaaminin.

Rasuulkii Eebana wuxuu ahaa «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» markuu seexanayo kii akhriya Suuraddan ilaa uu ka dhammeeyo. Waxaa wariyay Dhbaraani. Al-Kaafiruun (1-6).

Suurat An-Naşr
سُورَةُ النَّصْرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Markuu yimaaddo gargaarkii Eebe iyo Fatxiga (Furashada maka).

إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴿١﴾